**Ururada iyo howlaha bulshada**

Howlaha bulshada waa howlo loo qabto si iskaa wax u qabaso ah, kuwaasoo bulshada loogu daneynaayo. Qofku isaga ayaa ayaa iskiis u dooranaaya ka qeybqaadashada howlaha bulshada, waxaana ay ku xiran tahay hadba sida uu isagu howlahaas u xiiseeynaayo. Howlaha bulshada marka la sameynaayo waxaa lagu baran karaa arimo fara badan oo aad la qabaneysid dad kale, waxaa lagu wanaajin karaa xaaladda bulshada, ama waxaa saameyn lagu yeelan karaa arimaha bulshada.

Dalkaan Finland qof walba oo ku nool wuxuu xaq u leeyahay, suurtagalna u ah in uu saameyn ku yeesho, islamarkaana uu hore u wado oo socodsiiyo arimaha uu xiiseeynaayo, islamarkaana uu u arko in ay muhiim yihiin. Markii qofka ama kooxda dadka ah ay ka dareemaan noloshooda ama degaankooda arin dhibaato ah oo ka taagan ama cillad heysata,"taasoo u baahan in wax laga qabto", waxaa halkaas ka bilaabanaya howsha arimaha bulshada. Waxaa la bilaabayaa in la baaro qaabab kala duwan, oo arinkaasi saameyn loogu yeelan karo. Qaabka ugu fiican waa in lala xiriiro ururka ku lugta leh ama ka shaqeeya howlaha arinkaas la xiriira. Ururka waxaa loola jeedaa koox dad ah, kuwaasoo doonaaya in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sidii ay ku gaari lahaayeen hadaf wadjir ah oo ay leeyihiin. Haddii ururka ku haboon arinkaas la waayo, waxaa sidoo kale suurtagal ah in la aasaaso urur cusub.

**Wax wada qabsiga sidii lagu gaari lahaa ahdaafta guud ee naga dhexeysa**

Waxqabadka howlaha arimaha bulshada waxaa loola jeedaa howlqabadka dhowr qof, kuwaasoo ka tirsan ururo iyo jamciyado kala duwan. labada erey ee (Yhdistys) iyo (Järjestö) waxaa sida guud loola jeedaa hal arrin. Inta badan ereyga Järjestö waxaa la isticmaalaa, marka ururku uu yahay mid weyn oo u shaqeynaaya heer qaran ahaan ah. Finland waxaa ka jira in ka badan 100 000 oo urur oo diiwaangashan, kuwaasoo loo asaasay ujeedooyin kala duwan, tusaale ahaan: ururada caafimaadka iyo arimaha bulshada, kuwa degaanka iyo dadka, isboortiga, jimicsiga iyo arimaha dhalinyarada, dhaqanka, ururada hawlgabka, iyo ururo ka shaqeeya hiwaayadaha iyo waxyaabaha xilliyada firaaqada ah la qabto. Sidoo kale xisbiyada siyaasiga ah iyo jamciyadaha diiniga ahba waa ururo. Ururadu waxaa ay noqon karaan kuwo gaar ahaaneed , kuwo degaan ahaaneed, kuwo qaran ahaaneed iyo kuwo caalami ahba. Ururada waxaa loo asaasi karaa taabagelinta ujeedooyinka loo asaasay awgeed, mar haddii ay yihiin kuwo ku saleysan sharciga iyo habdhaqanka wanaagsan. Marka urur la asaasaayo waxaa loo baahan yahay saddex qof. Asaasidda ururka iyo waxkaqbashada howlihiisaba waxaa ay u baahan yihiin aqoonta iyo daryeelka nidaamyo iyo hannaan u gaar ah ururada. Asaasidda urur diiwaangashan, go'aan qaadashada, maamulka iyo baabi'inta ururkaba waa kuwo ku saleysan sharci u gaar ah oo loo dejiyay ururada. Sida kale ururuka iyo xubnihiisa ayaa waxay go'aan ka gaarayaan howlqabadka ururka u gaarka ah, kuwaasoo ah kuwo ku saleysan sharciyada u gaarka ah ururka. Ururku waa mid rasmi ah, qaab sharci ah ku shaqeynaaya, waxaana uu awoodaa in uu dalbado maalgelin kala duwan oo lagu taageeraayo howlihiisa. Sidoo kale ururku isaga ayaa ka mas'uul ah howlaha uu qabanaayo.

Sharciyada ururuka waxaa lagu xusaa, sababta ururka loo asaasay. Qofka ka tirsan ururka waxaa loogu yeeraa xubin. Waxaana ururka xubin ka noqon kara, qofka ansixiya ama aqoonsada ujeedada ururuka loo asaasay. Ururku isaga ayaa go'aan ka gaari kara qofka xubinka ka noqonaaya ururka. Ururo badan ayaa sidoo kale waxaa ay qabanqaabiyaan munaasbado, kuwaasoo ay suurtagal tahay in laga mid noqdo xubnaha ururka. Ka mid noqoshada ururuka waa mid iskeed ah (aan khasab ahayn), qofna laguma khasbi karo in uu ku biiro urur ka mid ah ururada. Haddii aad dooneyso in aad ku biirto urur ka mid ah ururada, waa in aad u sheegtaa ama ku wargelisaa ururkaas xiiseynta aad xiiseyneyso in aad ku biirto ururka. Dalkan Finland waxaa sharciga asaasiga ah lagu qoray arimaha ku saabsan xoriyadda isu imaatinka iyo ururada, wax xadidaad ahna sharcigu ma saaraayo arinka ku saabsan ku biirista qofku uu ku biiraayo ururada kala duwan, tan iyo inta uusan ururku ka shaqeynein arimo falal dambiyeed ah. Waxaa ururuku uu yeelan karaa lacagta laga qaado xubnaha ee kharashka xubinka oo sannadle ah. Qaar ka mid ah ururada waxaa ay leeyihiin

gunnooyin ama waxyaabo faa'iidooyin kala duwan ah oo ay siiyaan xubnahooda. Macluumaad badan oo ku saabsan asaasidda ururka iyo howlaha uu qabtaba waxaad ka heleysa internetka.

**Waa maxay sababta looga qeybgalaayo waxqabadka ama howlaha ururada?**

Ururadu waxaa ay xubnahooda u qabanqaabiyaan waxqabadyo kala duwan. Marar badanna, waxaa ay qabanqaabiyaan howlo ay suurtagal tahay in ay ka qeybqaataan xitaa dadka aan iyaga xubnaha ka aheyn, tusaale ahaan munaasabadaha loo qabanqaabiyo dadka ku nool degaanka, dhacdooyin kala duwan amaba barnaamijyo isboorti ah oo loogu tala galay dhalinyarada. Dadka ka soo qeybgalayaa howlahaasna waxaa mideynaaya waa xiisaha ay u hayaan howshaas la soo diyaariyay. In badan oo ka mid ah ka soo qeybgalayaasha howlaha ururadu qabnqaabiyaanna waxa kaliya oo u muhiimsan waa wada jirka xilligaas. Ururada dhexdooda waxaa laga bartaa sidoo kale dad cusub, waxaana lagu qaataa waqtiga, islamarkaana waxaa iyadoo la sameynaayo waxyaabao kala duwan, lagu bartaa xirfado cusub. Howlaha ururuka uu qabanaayo iyadoo loo maraayo, ayaa sido kale waxaa saameyn lagu yeelan karaa arimaha gaarsiisaan illaa heer bulsho. Sidoo kale ururadu waxaa ay bixiyaan shaqooyin. Jamciyadaha iyo ururaduba waxaa ay door muhiim ah oo muuqda ku leeyihiin bulshada dhexdeeda: Finland waxaa howlaha waxqabad ee ururadu ay ka jireen illaa iyo in ka badan 160 sano, waxaana ururadu ay sameyaan shaqoyin badan oo muhiim u ah howlaha waxqabad ee bulshada iyo dhinaca nolol wanaagga dadka. Ka qeybqaadashada howlaha waxqabad ee ururada, waxaad noqoneysaa qof ka qeybqaadanaya dhismaha bulso wanaagsan!

Xigasho iyo warbixin dheeraad ah:
http://www.demokratia.fi/tietotori/kansalaistoiminta/
https://www.kansalaisyhteiskunta.fi
https://www.toimeksi.fi/kansalaisille/yhdistystoiminta/
howlaha waxqabad ee ururada oo lagu qoray luqadda finishka ah ee la sahlay:
https://selko.fi/yhdistystoiminta/

Erey bixin

| | |
|---|---|
| Kansalainen | muwaadin |
| kansalaistoiminta | howlaha bulshada |
| yhteisö | bulsho |
| yhdistys | urur |
| järjestö | jamciyad |
| vapaaehtoistyö | shaqo iskaa u qabasho ah (aan khasab aheyn) |